

Abril 14, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha  
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Kordhinta muddada xaalada caafimaad ee degdega ah ee dadweynaha ee federaalka

Inta lagu jiro cudurka baahsan COVID-19, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) iyo dowladda federaalka ayaa qaaday tallaabo ay ku ilaalinayaan caafimaadka dadka helaya adeegyada oo ka dhex shaqeynaya nidaamka naafanimada korriinka ee Oregon.

Xaalada caafimaad ee degdega ah ee bulshada ee federaalka (PHE) ee loogu talagalay cudurka baahsan ee COVID-19 ee la qorsheeyay in uu wakhtigiisu dhaco Abril 16, 2022, ayaa la kordhiyay muddo 90 maalmood ah. Tani waxay na siinaysaa wakhti aanu ugu diyaar garowno dib ugu soo noqoshada nidaamyadeenii caadiga ahaa.

**Tallaabooyinka ku meel gaarka ah ee soo socda iyo waxyaabaha la iska dhaafay ayaa joogsan doona marka PHE-du joogsato:**

- Wicitaanada fiidiyowga si loo sameeyo heerka daryeelka (LOC), Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA) iyo qiimeynta khatarta ee meesha fog la joogo.
- Oggolaanshaha hore u jiray iyo awooda lagu kordhinayo oggolaanshaha adeega muddo hal sano ah iyada oo aan la sameynin Qorshaha Taageerada Shakhsi (ISP) oo cusub.
- Waalidinta iyo mas'uuliyiinta carruurta yar yar ee qabta naafanimada maskaxda iyo korrinka (I/DD) ee u adeegaya daryeel bixiyaha lacagta qaata ee ilmahooda ahaan.
- Joojinta ogeysiinta dadweyne ee caadiga ah ee Qabiilka iyo nidaamka wadatashiga ee loogu talagalay Soo gudbinta Medicaid.
- Barnaamijyada adeegyada bulshada ku saleysan ee isticmaalaya oggolaansho dhanka afka ee loogu talagalay qorshayaasha adeega qofka ku saleysan,

- Joojinta baaritaannada faraha la iska qaado ku saleysan ee taariikh dembiyeedka ee loogu talagalay shaqaalaha cusub.

Waxaanu soo saari doonaa wada xiriiro wata amaro iyo tilmaamaha siyaasada rasmiga ah oo lagu taageerayo shaqaalaha iyo hawl wadaagayaasha inta lagu jiro kala guurkani.

Waad mahadsan tihiin dhammaan intii wax ka beddeshay nidaamyadooda si ay u daryeelaan dadka reer Oregon ee qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) inta lagu jiro PHE-da federaalka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).